

WAXBARASHADA XIRFADA & FARSAMADA KOORSOOYINKA LIISKA



Liiska Koorsoooyinka 2024-2025



WAXBARASHADA XIRFADA & FARSAMADA

GAADIID BILAASH AH OO AAD KU TAGAYSO UGANA SOO LAABANAYSO DUGSIGAAGA SARE

CTE ee MPS...

Koorsooyinka CTE waxa ay bixiyaan fursad aad ugu xirmato waxa aad ku baranayso xiisadahaaga asaasiga ah (xisaabta, sayniska, faniga luqadda, cilmiga bulshada) adiga oo adeegsanaya hawlo la xiriilo xirfada shaqada, oo baraatiko ah, dhisaya siifiigaaga oona horumarinaya xirfado dhab ah oo loogu talagalay dunida dhabta ah.

Koorsooyinka CTE waxa ay kuu oggolaanayaan in aad sahmiso shaqooyin ballaaran oo kala duwan iyo xirfadaha xirfada leh ee la xiriira adigoo isla markaana:

- qeexaya hamigaaga shaqo,
- kasbanaya kiridhitka/buundada kulleejka,
- horumarinaya xirfado laga aqoonsan yahay aaggaa shaqada,
- dejinaya qorshayaashaada kadambeeeya qalin-jabinta dugsiga sare, oo
- u diyaargaroobaya waxa soo socda!

Ardayda dhigata fasalada 11aad & 12aad waxa ay iska diiwaangelin karaan midkasta oo kamid ah koorsooyinka shakhsii ahaan loo dhiganayo iyo kuwa onlaynka ah ee CTE.

Ardayda dhigata fasalka 10aad waxa ay koorsa kasta oo onlayn ah iska diiwaangelin karaan simistarka 1aad, halka labadaba koorsooyinka onlaynka iyo kuwa shakhsii ahaan loo dhiganayo ay iska diiwaangelin karaan simistarka 2aad.

Ardayda dhigata fasalka 9aad waxa ay iska diiwaangelin karaan 99201 - Xirfadaha Baarista (ka eeg bogga 4) taas oo kaa caawin doonta in aad aqoonsato daneyniada qaadashada koorsooyinka CTE ee dheeraadka ah ee fasalka 10aad, 11aad, ama 12aad oo aadna go'aansato haddii aad daneyneso sii wadida shahaadada Barnaamijka Xirfada Shaqada ee Int'l Baccalaureate.

Koorsa kasta oo CTE ah oo aad qaadato waxa ay beddeli doontaa hal ama labo xiisadood oo fasal inta lagu jiro maalintaada dugsiga.

- Ardaydu waxa ay koorsada CTE ee onlaynka ah dhigan karaan saacad kasta oo maalinta ah. Koorsooyinka CTE ee onlaynka ah badankooda waxa ay u dhigmaan 0.5 kiridhit/buundo oo dugsiga sare ah. Koorsooyinka onlaynka ah waxaa tilmaamaya "AO" oo ugu qoran koodhkooda diiwaangelinta.
- Ardaydi koorsooyinka qeybta iska diiwaangelisa Xarunta Tignoolajiyadda waxaa la siin doonaa gaadiid sii socod iyo soo socod ah oo bilaash ah oo ay ku tagaan ugana soo laabtaan fasaladooda. Koorsada qeybta ee laga qaato Xarunta Tignoolajiyadda waxa ay la mid tahay 1.0 kiridhit/buundo oo dugsiga sare ah

Jadwalka Ganbaleelka ee Xarunta Tignoolajiyadda ee Loo Soo Jeediyey CTE-da 2024-2025

Quraac bilaash ah ayaa laga helayaa Xarunta Tignoolajiyadda ee kasta, 7:35-8:00 a.m. Dhammaan ardayda waxa ay kasoo qadeeyaa gurigooda dugsiga sare.

7:25 - 8:00 a.m. Gaadiid Bilaash ah ayaa laga helayaa dugsigaaga sare - waqtiyada qaadista waa ay ku kala duwan yihiin goobaha.

Qeybta Xiisadaha Gelinka Hore | 8:05 - 10:00 a.m.

10:05-10:35 a.m. Gaadiid Bilaash ah oo loogu laabanayo dugsiyada sare

Xiisadaha Barqadi | Inta u dhaxeysa 10:05 a.m. - 1:00 p.m. Waqtiyadu wss ay kala duwan yihiin Xarun kasta oo Tignoolajiyadeed

12:15-1:00 p.m. Gaadiid Bilaash ah ayaa laga helayaa dugsigaaga sare - waqtiyada qaadista waa ay ku kala duwan yihiin goobaha.

Qeybta Xiisadaha Gelinka Dambe | 1:05 - 3:00 p.m.

3:05 - 3:45 p.m. Gaadiid Bilaash ah oo loogu laabanayo dugsiyada sare.



Hel koorsooyin kugu habboon...

Tillaabada 1: Ka eeg koorsooyinka la bixiyo liiskan

Baro waxbadan oo ku saabsan CTE & Barnaamijka Xirfadda I.B.	Bogga 2
Sahminta Xirfadda Shaqada	Bogga 5
Beeraha	Bogga 8
Ganacsiga	Bogga 9
Waxbarashada Magaalada	Bogga 10
Sharciga & Badbaadada Dadweynaha	Bogga 11
Daryeelka Caafimaadka	Bogga 12
Kombiyuutar Sayniska	Bogga 13
Fanka Warbaahinta	Bogga 15
Injineerinka	Bogga 16
Robotyada & Tignoolajiyada Aan Duuliyaha Lahayn	Bogga 17
Baabuurta	Bogga 19
Dhismaha & Alxanka	Bogga 20
Tignoolajiyadda Mashiinka	Bogga 21

@ South High sanad dugsiyeedka SY2024-2025

Tillaabada 2: Aqoonso koorsooyinka ku xiiso gelinayo

Tillaabada 3: Koorsooyinkaaga ka dooro barta

ctecoursefinder.mpls.k12.mn.us

Marka aad gudbiso koorsooyinka aad dooratay adigoo adeegsanaya Aaladda CTE Course Finder lataliyahaaga dugsiga sare waxaa si otomaatig ah lagu ogeysiin doonaa daneynistaada waxa uuna kaa caawin doonaa dhameystirka habka diiwaangelinta rasmiga ah.

Xog dheeraad ah:

- Dhammaan koorsooyinka CTE waxaa kiridhit/buundo ikhtiyaari ah loogu tiriya shuruudaha qalin-jabinta ee dugsiga sare. Qaar kamid ah koorsooyinka CTE waxaa sidoo kale loo xisaabiyyaa shuruuda qalin-jabinta Farshaxanka ama Sayniska.
- Qaar badan oo kamid ah koorsooyinka CTE waxa ay u qalmaan kiridhitka/buundada kulleejka. Haddii koorsa ay u qalanto kiridhitka/buundada kulleejka waxaa lagu tilmaamaa jaantuuska ku yaala bog kasta.
- Goobaha koorsooyinka waxaa lagu aqoonsadaa jaantuuska ku yaala bog kasta. Ikhtiyaarada waxaa kamid ah fool-ka-fool oo lagu dhiganayo Xarunta Tignoolajiyadda CTE, onlayn ama xaalado yar goobo aan ahayn Xarunta Tignoolajiyadda CTE.
- Kooso bixinta sanadlaha ah waxaa lagu saleyn doonaa daneynista ardayda iyo tirada is-diiwaangelinta.

10



Career-related
Programme

Reasons

why the IB Career-related Programme (CP) is the ideal study for students looking to pursue a range of pathways

1



It encourages you to think about others

The service learning course allows you to make a positive difference to the world around you.

2



Explore, understand and engage in real world issues

The CP requires you to explore, analyse and evaluate global issues from a local perspective.

3



It integrates academic and practical learning

The CP combines academic rigour with practical study; and develops skills and competencies required for life-long learning.

4



It allows you to do what you really want to do

You can combine your academic subjects with your interests and skills.

10



Become an independent learner

Taking part in the reflective project, you learn how to research subjects and explore multiple sources of information.

6



Learn about different cultures

Language development encourages you to engage with other cultures and increase your understanding of the wider world.

5



It gives you more career options

With a CP, you can access further education, apprenticeships and employment in areas such as business, IT, health care, sports and many others.

9



Develop essential life skills

Skills including critical thinking, communication and personal development are an important focus of the CP.

7



Build friendships and connections

Collaborative projects allow you to build friendships as well as working relationships.

8



Explore and apply your creativity in innovative ways

Personal and professional skills courses promote creative thinking techniques.



International Baccalaureate
Baccalauréat International
Bachillerato Internacional

www.ibo.org/cp

© International Baccalaureate Organization 2014
International Baccalaureate® | Baccalauréat International® | Bachillerato Internacional®



WAXBARASHADA XIRFADA & FARSAMADA

Xirfadaha Dhabta ah ee loogu talagalay Dunida Dhabta ah

Maantaba isdiwaangeli!

La xiriir isku duwaha IBCP ee jooga dugsigaaga sare ama iimayl u dir
cteinfo@mpls.k12.mn.us.

Barnaamij la Xiriira Xirfadda



Barnaamij la Xiriira Xirfadda IB

Deegaanka lagu diyaariyey. Caalamka la tiigsi ah.

Barnaamijkani waxaa loo heli karaa dhammaan ardayda daneynaysa ee dhigata fasalada 11^{aad} iyo 12^{aad} ee dhigta Dugsiyada Sare ee IB ee MPS.

Barnaamijkha Xirfadda IB la xiriirta (IBCP) waa isu keenista koorsooyinka Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada oo adag, oo heer kulleej ah iyo koorsooyinka Barnaamijkha Dhibloomada IB.

Barnaamijkani waxa uu ardayda siiyaa fursad ay ku horumariyaan xirfado laga aqoonsan yahay aagga shaqada, helitaanka buundada/shahaadooyinka kulleejka, kuna sii horumariyaan waxbarashadooda inta ay isu diyaarinayaan tignoolajiyad sare, mushaar sare, xirfadadaha shaqo ee loo baahi qabo.

Ka Dooro 15 Tub Xirfadeed

- Beeraha
- Tignoolajiyadda Gawaarida & Dayactirka Gawaarida Isku Dhacay
- Hal-Abuurka Ganacsiga & Suuqgeynta
- Kombiyuutar Sayniska
- Dhismaha
- Amniga Intarneedka
- Waxbarashada
- Injineernimada
- Daryeelka Caafimaadka
- Sharciga & Badbaadada Dadweynaha
- Tignoolajiyadda Mashiinka
- Fanka Warbaahinta
- Robotyada & Tignoolajiyada Aan Duuliyaha Lahayn
- Alxanka
- & fursado kale oo badan oo la jaanqaadaya kulleejyada maxalliga iyo la-hawlgalayaasha bulshada MPS oo ku salaysan danta ardayga

Marka laga yimaado qaadashada shaqada koorsada 1.5 kiridhit ee CTE ee la xiriirta xirfada la daneynayo, ardayda IBCP waa inay dhammeeyaan koorsooyinka soo socda inta ay ku jiraan fasalka 11aad & 12aad si ay u qaataan shahaadadooda IBCP.

- Labo koorso ama kabadan oo Barnaamijkha Dhibloomada IB ah
- Koorso luqadda adduunka ah ama wax-isbarid madaxbannaan
- 50 saacadood oo Barashada Adeegga ah
- Mashruuc Milicsi Leh
- Koorso CTE ah, 99204 Xirfadaha Shakhsiyed & Kuwa Xirfadeed ee IB (ka eeg bogga 4)



Ma hubtid miyaa koorsada CTE ee kugu habboon?

Iskaangaree sawirka koodhka Jawaabta Degdegga si aad wax uga ogaato koorsooyinka CTE iyo tubta xirfadaha shaqo ee sida ugu fiican ugu habboon shakhsiyadaada, danahaaga iyo meelaha aad ku wanaagsan tahay.

MAANTABA BILOW IN AAD SAHMISO.



ctecoursefinder.mpls.k12.mn.us

**WAXBARASHADA
XIRFADA &
FARSAMADA**

Sahminta Xirfadda Shaqada

SOO HEL. U DIYAARGAROW. GAAR.



Weli miyaad dejineysaa qorshayaashii waxa aad sameyn rabto dugsiga sare kadib? Wuxuu aad ku baraneysa dugsiga sare ku xir khibradaha dunida dhabta ah iyo xulashooyinka xirfadaha sida ugu wanaagsan ula jaanqaadayo waxyaabaha aad daneyneso iyo kartidaada dabiiciga ah. Horumari xirfadaha shaqada looga baahan yahay in guul looga gaaro goobta shaqada oo sahmi shaqoooyinka iyo xirfadaha loo baahan yahay in loogu biiro qeybta shaqada ee dookhaaga ah.

Looga heli karo shakhsii ahaan ama onlayn ahaan dugsigaaga sare

Koodhka Isdiiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhikta Kulleejka
99201	Xirfadaha Baarista (Loo heli karo ardayda fasalka 9aad)	Maya	.5	Ikhtiyaari	Maya

Naqshadee mustaqbalkaaga oo samee qorshayaal ku aadan nolosha kadib ka qalin-jabinta dugsiga sare! Koorsadan dhexdeeda waxaad sameyn doontaa boortofooliyo shakhsiyeed oo la jaanqaadaya hamigaaga shaqo—baari doontaa isbeddellada shaqo ee hadda iyo mustaqbalka; laga wada hadli doonaa arrimaha caafimaadka/badbaadada shaqada iyo cilaqaadka shaqaalaha iyo loo shaqeyaha; aqoonsan doontaa qiyamka shakhsii ahaaneed, shaqada, iyo qaab nololeedka; oo sameyn doontaa siifii xirfadeed. *Koorsadani waxay shuruud u tahay koorsada 99205.*

99203	Qorsheynta & Horumarinta Xirfada	Maya	.5	Ikhtiyaari	Maya
-------	----------------------------------	------	----	------------	------

Sahmi danahaaga xirfad-shaqa! Koorsadan ku saleysan mashruuca waxa ay ku dhisan tahay aqoonti hore iyo khibrad nololeedaya si laguugu hago habka aad u dejinayso yoolalka u diyaarsanaanta shaqada iyo kulleejka kuwaas oo la jaanqaadaya himilooyinkaaga shaqo ee gaarka kuu ah. Loo qaabeeyey kadib koorsoooyinka waxbarashada madaxa—bannaan, waxaad kala shaqayn doontaa macalinkaaga iyo la-hawlgalayaasha bulshada si aad u abuurto qorshe mashruuc oo qeexaya hawlaha waxqabadyada iyo cilmi—baaris aad samayn doonto si aad u sii horumariso xirfadahaaga iyo aqoontaada ku aadan aag shaqo oo gaar ah.

99204	Xirfadaha Shakhsiyeed & Kuwa Xirfadeed ee IBCP	Maya	.5	Ikhtiyaari	Maya
-------	--	------	----	------------	------

Ma tahay arday IBCP ah? Tani waa koORSO IBCP oo loo baahan yahay waxayna bixisaa latalin iyo wakhti fasal si loo habeeyo loona dhamaystiro Mashruuca Milicsiga (cilmi—baarista shaqada) oo looga shaqeeyo Boortofooliyadooda Luqadda. Horumari xirfadaha abaabulka, wada-xiriirka, wada-shaqeynta, milicsiga, go'aan gaarista anshaxa, wacyigelinta dhaqanka, iyo aqoonta macluumaadka ee goobta shaqada.

99205	Khibradda Xirfadda Shaqada (kaliya fasalada 11aad iyo 12aad)	99201	.5	Ikhtiyaari	Maya
-------	---	-------	----	------------	------

Lacag shaqeyso adigoo waxbaranaya! Ku xiriiri waxa aad ku baraneysa iskuulka adiga oo adeegsanaya khibrado shaqo oo mushaari ah iyo kuwo aan mushaari ahayn oo ah bulshada dhexdeeda. Dhis khibrado siifii u qalma oo xoaji danahaaga shaqo. Dhammaan khibradaha shaqo waxaa kormeeri doona macallinka waxbarashada ku salaysan shaqada ee MPS waxaana la waafajin doonaa shuruudaha Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Waa in aad jirtaa 16 sano si aad isaga diiwaangeliso koorsadan.



Ma daneynesa in aad sahmiso fursadaha shaqo ama shaqo-barashada sannad-dugsiyeedka?

Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogaado!



Beeraha Magaalada

BEER. KORI. GOOSO.



Sahmi adduunka dabiiciga ah ee firfircoo, isla halkan magaalada. Baro sida dhirta iyo ciida lafdhabar ugu yihiin caafimaadka iyo nolosha aadanaha. Xalli dhibaatooyinka cunno helitaanka ee bulshadaada dhexdeeda. Waxaan oo dhan iyo in ka badan ka ogow fasalada Beeraha Magaalada.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda Edison

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
90101 90201	Beeraha Magaalada Sayniska Dhirta & Beero-falashada	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

90101 Beeraha Magaalada – 90101

Sahmi tignoolajiyadaha soo baxaya oo baro sida beeraha magaaloooyinka, sayniska cuntada, iyo kheyraadka dabiiciga ahi ay wax uga beddelayaan sida aan u naqshadeyno oo aan u maareyno cunto soo saarka bulshada ku saleysan ee maxalliga ah. Iyo, dhis boortofooliyo shaqsiyadeed iyo siifii muujinaysa aqoontaada iyo xirfadaha shaqo-helid ee u diyaargarowga shaqo barasho maxali ah.

Sayniska Dhirta & Beero-falashada – 90201

Horumari xirfadaha loogu koriyo dhirta goobo kala duwan, naqshadeynta qaab-dhismeedka dhulka, iyo dayactirk. Baro sida beeraha magaalada iyo qaabeynta dhulka ay garwadeenka ugu yihiin sayniska dhirta, deegaanka, iyo kheyraadka bulshadeena maxalliga ah.

CTE | Onlayn

Ma jiro gaadiid loo baahan yahay – koorsooyinka ayaa laga bixiyaa dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

90101AO	Beeraha Magaalada	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	-------------------	------	----	------------	-----

Sahmi tignoolajiyadaha soo baxaya oo baro sida beeraha magaaloooyinka, sayniska cuntada, iyo kheyraadka dabiiciga ahi ay wax uga beddelayaan sida aan u naqshadeyno oo aan u maareyno cunto soo saarka bulshada ku saleysan ee maxalliga ah. Iyo, dhis boortofooliyo shaqsiyadeed iyo siifii muujinaysa aqoontaada iyo xirfadaha shaqo-helid ee u diyaargarowga shaqo barasho maxali ah.

90201AO	Sayniska Dhirta & Beero-falashada	90101	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	-----------------------------------	-------	----	------------	-----

Horumari xirfadaha loogu koriyo dhirta goobo kala duwan, naqshadeynta qaab-dhismeedka dhulka, iyo dayactirk. Baro sida beeraha magaalada iyo qaabeynta dhulka ay garwadeenka ugu yihiin sayniska dhirta, deegaanka, iyo kheyraadka bulshadeena maxalliga ah.



**Ma daneyneysaa inaad barato sida
cuntada loogu beero magaalada weyn?**

Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogaado!





Ma daneyneysaa inaad socodsiiso ganacsi kuu gaar ah ama aad korto jaraanjaraada shirkadnimo? Baro sida loo adeegsado xirfadahaaga gorfeynta, hal-abuurka ganacsiga, iyo hogaaminta si aad ugu qorto qorshe ganacsi oo guul leh, u suuqgeyso fikrad cusub, gunta u gasho xogta, u maareyso kooxaha una horumariso xirfadaha mashruuc-maareynta oo taageeri doona doorasho kasta oo mustaqbalka ah.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda Edison

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodha Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
93511 93711	Hal-Abuurka Ganacsiga Mabaadii'da Suuqgeynta	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Hal-Abuurka Ganacsiga - 95311

Weligaa ma ku fikirtay in aad kala socodsiiso ganacsi kuu gaar ah? Baro sida loo baaro guusha suurtagalka ah ee fikradaada ganacsi, sida loo qoro qorshe ganacsi, loona xafido diiwaano sax ah. Mowduucyada waxaa kamid ah xisaabaadka, suuqgeynta, kheyraadka shaqaalaha, caymiska, maamulka maaliyadda, bangiyada iyo qiimaynta kharashaadka iyo faa'iidooyinka hal-abuur ganacsi.

Mabaadii'da Suuqgeynta - 93711

Baro sida si guul leh loogu xayeysiyo oo badeecadaha loogu suuqgeeyo qof macmiil ah. Baro fikradaha aasaasiga ah ee suuq-geynta, horumarinta badeecada, xeeladaha qiiimo u jaangointa, kanaalada qeybinta, xayeysiinta, iyo habdhqaanka iibsadaha. Kor u qaad wacyigaaga bulshada adigoo gorfeynaya oona qeexaya baahida suuqa, samee cilmi-baaris oo horumari istaraatijiyad suuq oo wax ka qabaneysa badeecada, qiiimaha, goobta, iyo xayeysiinta.

91056 91646	Sayniska Xogta 1 Sayniska Xogta 2	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa
----------------	--------------------------------------	------	-----	------------	-----

Sayniska Xogta 1 - 91056

Baro sida xogta loo qabto oo u adeegso in aad ku wadaagto fariimo awood badan! Koorsadan dhexdeeda ardaydu waxay Microsoft Excel u adeegsan doonaan inay ku maareeyaan xogta la xiriirta arrimaha dunida dhabta ah, iyagoo saxaya xirfadahooda ay ku gorfeynayaan, ku fahmayaan oona ku matalaya xaqiyooyinka iyagoo adeegsanaya xogta.

Sayniska Xogta 2 - 91646

Ka raadi qaabab aanan la arkin xogta jirta! Koorsadan horumarsan dhexdeeda sii wad sahminta xog aad u tiro badan adiga oo isticmaalaya qalab iyo farsamooyin casri ah si aad uga hesho qaabab aanan la arkin, uga soo dhix bixiso macluumaa macno ku fadhiya, una gaarto go'aanada ganacsiga.

93739	Ganacsiga IB iyo Maareynta SL	Maya	1.0	Ikhtiyaari (IB)	Haa
-------	-------------------------------	------	-----	-----------------	-----

Sahmi dhaqamada ganacsiga caalamiga ah ee adag oo firfircoo! Adeegso aragtiyaha maareynta ganacsiga iyo daraasado kiis si aad u sahmiso hawlaho ganacsiga ee maarynta kheyraadka shaqaalaha, maaliyadda iyo xisaabaadka, suuq-geynta iyo maareynta hawlallada iyada oo laga eegayo dhaqanka, anshaxa, caalaminimada, hal-abuurka iyo istiraatijiyadda. Ma u baahnid in aad noqoto arday IB ah si aad u qaadato koorsadan.

CTE | Onlayn

Ma jiro gaadiid loo baahan yahay - koorsooyinka ayaa laga bixiyyaa dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

93301AO	Maaliyadda Shakhsiyeed	Maya	.5	Ikhtiyaari	Maya
---------	------------------------	------	----	------------	------

Maaliyadda Shakhsiyeed - 93301AO

Baro sida loo maareeyo lacagtaada. Koorsadani waxay diiradda saareysaa maareynta kheyraadka shaqsi iyo qoyska. Baro sida loo sameeyo miisaaniyad qoys oo macquul ah, qorshee dhacdooyinka maaliyadeed ee lama filaanka ah, qiiimee adeegyada maaliyadeed iyo bangiyada, naqshadee boortofooliyo maalgashi, oo buuxi foomamka canshuurta dakhliga ee shakhs ahaaneed. Diyaargarow weyn oo aad gaarkaaga u noolaaneyso!

93506AO	Hordhaca Ganacsiga	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	--------------------	------	----	------------	-----

Qaad tallaabada koowaad ee aad ku fahmeysa waxa ay qaadaneyso in la socodsiyo ganacsi guul leh. Fasalkani waxa uu sahmin doonaa ganacsi lahaanshaha, anshaxa, go'aan qaadashada, iyo ganacsiga marka laga eego dhinaca maxaliga ah iyo dhanka caalamiga ah iyada oo loo marayo mashruucyo baraatiiko ah iyo jilitaano ganacsi.

Waxbarashada Magaalada

NIYAD-GELI. HAWLGELI. TAAGEER.



Sahmi dhammaan dhinacyada waxbarashada magaalada inta aad la shaqeyneyso macalimiinta iyo ardayda MPS. Naqshadee cashiro qorsheynta oo dhexgal ilmaha. Ahow qof wax saameeya! Noqo macalin, la taliye dugsi, ama shaqaale bulsho oo saameyn xoog badan ku yeelo bulshadeena.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
02041 02061	Horudhaca Waxbarashada Magaalada Waxbarashada Dhaqamada Kala Duwan	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Horudhaca Waxbarashada Magaalada - 02041

Wax ka baro taariikhda Dugsi Dhigashada Mareykanka iyo falsafooyinka waxbarashada sahanka taariikhda dugsi dhigashada iyo falsafooyinka waxbarashada. Ka hadal arrimaha hadda soo wajahaya ardayda, qoysaska, macalimiinta, dugsiyada, degmooyinka iyo bulshooyinka. Marka laga yimaado waqtiga fasalka, ardayda waxaa looga baahan doonaa inay si firfircooni uga qeybqaataan 30 saacadood oo barashada adeegga dugsiyada K-12/adeegga bulshada ah.

Waxbarashada Dhaqamada Kala Duwan - 02061

Horumari falsafad manhaj oo ka tarjumta aaminsanaantaada iyo qiyamkaaga oo ay ku jiraan istiraatijiyyadaha waxbarista, aaladaha, iyo kheyraadka loogu talagalay in lagu kobciyo kordhinta awoodda ardayga, guulgaarista, iyo sinnaanta waxbarashada ee ardayda oo dhan. Daraasee istiraatijiyyadaha waxbarasho ee cilmi baarista ku qotoma si aad u dabooshoo baahiyaha kala duwan ee ardayda laga bilaabo kooxaha ku kala duwan isirka, awoodda, dhaqanka, dhaqanka-dhaqaale iyo afafka.

02051 02071	Tignoolajiyadda Barayaasha Horudhaca Waxbarashada Gaarka Ah	02041	1.0	Ikhtiyaari	Haa
----------------	--	-------	-----	------------	-----

Tignoolajiyadda Barayaasha - 02051

Bare mustaqbal ka ahaan, horumari xirfadaha tignoolajiyadda si aad ugu taageerto waxbarashada ardayga. Sahmi aalado kala duwan oo badan oo loogu talagalay qorsheynta, waxbarista, wada-xiriirkha iyo diiwaan-keydinta. Kaqeybqaado doodaha "kala qeybsanaanta dhijitaalka" iyo sidoo kale arrimaha anshaxa iyo sharciga ee ku saabsan tignoolajiyadda iyo wadaagista macluumaadka.

Horudhaca Waxbarashada Gaarka Ah- 02071

Sahmi waxbarashada gaarka ah: taariikhda goobta, hababka fikradaha, qeexitaannada, kala soocitaanada, qaababka adeeg-bixinta, isbeddellada iyo arrimaha. Daraasee caqabadaha jireed, bulsho, garasho, iyo habdhaqan ee saameeya carruurta iyo dhalinyarada naafada ah. Waxkala soco dhinacyada sharciga iyo sharci-dejinta muhiimka ah ee la xiriira ardayda baahiyaha gaarka ah qaba.



Ma daneyneysaa xirfad shaqo oo Waxbarashada ah?

Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogado!



Sharciga & Badbaadada Dadweynaha

KA JAWAAB. BAAR. ILAALI. U ADEEG.



Sahmi dhammaan dhinacyada tubta xirfadda ee sharciga, badbaadada dadweynaha, iyo ka jawaabaha koowaad. Laga soo bilaabo saraakiisha booliska ilaa shaqaalaha dabdemiska ilaa xubnaha golaha deegaanka iyo baarayaasha dembiyada qeypta sharciga iyo badbaadada dadwaynaha waxay bixisaa fursado shaqo oo balaaran.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda Edison

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
91101 91201	Horudhaca Sharciga & Shaqaalaha Rayidka Xiriirka Booliska & Bulshada	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Horudhaca Sharciga & Shaqaalaha Rayidka - 91101

Hel eegitaan daaha gadaashiisa ah ee nolosha ka jawaabayaasha koowaad ee gurmadka ee bulshadeena! Koorsadan dhexdeeda waxaad baran doontaa Shahaadadaada Gargaarka Koowaad/CPR ee Bisha Cas waxaadna baran doontaa xirfado nolol badbaadin ah oo qiimo badan iyo mas'uuliyyadaha loo baahan yahay marka aad timaado goob ay xaalad degdeg ahi kajirto.

Xiriirka Booliska & Bulshada - 91201

Doodaha iyo waxqabadyada waxa ay dabooli doonaan mabaadii'da kadambeysa kala dambeysta bulshada, sida nidaamka caddaaladdu u shaqeeyo, iyo dib-u-eegis iyo faham dhammaystiran oo ku saabsan sida booliska, maxkamadaha, iyo waaxaha asluubta loogu talagalay inay iskula shaqeeyaan si ay u taageeraan saamileyda gaarka ah iyo bulshooyinka.

CTE | Onlayn

Ma jiro gaadiid loo baahan yahay - koorsooyinka ayaa laga bixiyea dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

91101AO	Horudhaca Sharciga & Shaqaalaha Rayidka	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa

Hel eegitaan daaha gadaashiisa ah ee nolosha ka jawaabayaasha koowaad ee gurmadka ee bulshadeena! Koorsadan dhexdeeda waxaad baran doontaa Shahaadadaada Gargaarka Koowaad/CPR ee Bisha Cas waxaadna baran doontaa xirfado nolol badbaadin ah oo qiimo badan iyo mas'uuliyyadaha loo baahan yahay marka aad timaado goob ay xaalad degdeg ahi kajirto. Doodaha iyo waxqabadyada waxa ay dabooli doonaan mabaadii'da kadambeysa kala dambeysta bulshada, sida nidaamka caddaaladdu u shaqeeyo, iyo dib-u-eegis iyo faham dhammaystiran oo ku saabsan sida booliska, maxkamadaha, iyo waaxaha asluubta loogu talagalay inay iskula shaqeeyaan si ay u taageeraan saamileyda gaarka ah iyo bulshooyinka.

91201AO	Xiriirka Booliska & Bulshada	91101	.5	Ikhtiyaari	Haa

U adeeg oo ilaali bulshadaada! Koorsadan dhexdeeda waxaad sahmin doontaa walaacyada gaarka ah iyo isdhixgallada taariikhiga ah ee fulinta sharciga ee ay la leeyihiin dadyowga isir ahaan iyo dhaqan ahaanba kala duwan. Doodaha iyo waxqabadyada waxa ay diiradda saari doonaan arrimaha dhaqangelinta sharciga ee casriga ah oo ay ku jiraan ka-hortagga dembiyada, xiriirka booliska iyo bulshada, go'aan gaariista anshaxa, kala duwanaanta dhaqanka, xirfadda booliska, xadgudubka guriga, dembiyada eexda ku qotoma, iyo wada-xiriirada dadka u dhexeeya.



**Ma daneyneysaa xirfad shaqo oo ah
Sharciga & Badbaadada Dadweynaha?**

Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogado!



Daryeelka Caafimaadka

CILMI BAARIS KU SAMEE. OGOW CUDURKA. KAHORTAG. BOGSII.



Weligaa ma la yaabtay sida jirka aadanuhu u shaqeeyo? Hel khibrad baraatiko ah iyo aqoon wax ku ool ah oo kuu diyaarin doonta inaad gasho xirfado shaqo oo daryeelka caafimaadka iyo dawada ah oo kala duwan laga bilaabo ka jawaabaha xaaladda degdegga, kaaliyaha kalkaalinimada, dhakhtarka, ama farsamo yaqaanka farmashiga.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiwaangeli	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
98126 98616	Eray Bixinta Caafimaadka Gunta Daryeelka Caafimaadka	Maya	1.0	Ikhiyaari	Haa

Eray Bixinta Caafimaadka - 98126

Fasiix ku noqo luqadda xirfadlayaasha caafimaadka! Koorsadani waxay diiradda saartaa aqoonsashada iyo fahmidda ereyada caafimaadka iyo qaab-dhismeedka jirka aadanaha. Waaad baran doontaa sida saxda ah ee loogu dhawaaqo loona hinkaadiyo ereybixinta caafimaadka, sida loo tarjumo iyo sida adeegsado ereyada badanaa la soo gaabiyo ee caafimaadka ee lagu qoro foomamka iyo diiwaanada caafimaadka, iyo sidoo kale awooda qorista, akhrinta iyo tarjumaada kiisaska caafimaadka.

Gunta Daryeelka Caafimaadka - 98616

Ma daneyneysaa inaad sahmiso xirfadaha shaqo ee daryeelka caafimaadka? Lyadoo la adeegsanayo koorsadan heerka gelitaanka ah waxaad wax ka baran doontaa xirfadaha aasaasiga ah ee looga baahan yahay ka shaqeeynta xirfad kasta oo daryeelka caafimaadka ah. Mowduucyada waxaa kamid ah: wacyiga iyo dareemista baahida macmiilka/bukaanka, habdhaqanada guusha ah ee goobaha daryeelka caafimaadka, xirfadaha wada-xiriirkha ee loo baahan yahay, anshaxa, arrimaha sharciga, ixtiraamka kala duwanaanta macmiilka iyo shaqaalahi, iyo heerarka badbaadada daryeelka caafimaadka.

98636	Qaab-dhismeedka Jirka & Cilmiga Noolaha	Maya	1.0	Ikhiyaari	Haa
-------	---	------	-----	-----------	-----

U Sahmi jirka aadanaha heerka unugga iyo habdhisyada! Koorsadani waxay bixisa aasaaska muhiimka ee xirfad kasto oo daryeelka caafimaadka ah. Baro aqoonsashada qaab-dhismeedyada jirka dhexdiisa ah iyo hababka iyo shaqoyinka la xiriira qaab-dhismeedyadaan. Habdhisyada jirka ee lagu barto waxaa kamid ah qolfoofta, neefsashada, wareegga dhiigga, dareeraha jirka, neerfaaha, lakabka sare ee jirka iyo caloosha iyo mindhicirada.

98126 98146	Eray Bixinta Caafimaadka Ka Jawaabaha Caafimaadka ee Xaaladda Degdegga	Maya	1.0	Ikhiyaari	Haa
----------------	--	------	-----	-----------	-----

Eray Bixinta Caafimaadka - 98126

Fasiix ku noqo luqadda xirfadlayaasha caafimaadka! Koorsadani waxay diiradda saartaa aqoonsashada iyo fahmidda ereyada caafimaadka iyo qaab-dhismeedka jirka aadanaha. Waaad baran doontaa sida saxda ah ee loogu dhawaaqo loona hinkaadiyo ereybixinta caafimaadka, sida loo tarjumo iyo sida adeegsado ereyada badanaa la soo gaabiyo ee caafimaadka ee lagu qoro foomamka iyo diiwaanada caafimaadka, iyo sidoo kale awooda qorista, akhrinta iyo tarjumaada kiisaska caafimaadka.

Ka Jawaabaha Caafimaadka ee Xaaladda Degdegga - 98146

Baro sida nolosha loo badbaadiyo! Horumari xirfadaha iyo aqoonta caafimaad ee xaaladda degdegga si aad u caawiso dadka dhaawacmay ama jirro degdeg ah ay kusoo booday ama qabo dhibaato caafimaad. Koorsadani waa tallaabada koowaad ee aad ku kasbaneysa shahaadadaada Ka Jawaabaha Caafimaadka ee Xaaladda Degdegga ee Hay'adda Bisha Cas ee Mareykanka.



**Ma daneyneysaa qaadashada
xiisadaha Daryeelka Caafimaadka?**
Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogado!



Daryeelka Caafimaadka

CILMI BAARIS KU SAMEE. OGOW CUDURKA. KAHORTAG. BOGSII.



CTE | Onlayn


Ma jiro gaadiid loo baahan yahay – koorsooyinka ayaa laga bixiyaa dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

Koodhka Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
98126AO	Eray Bixinta Caafimaadka	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa

Fasiix ku noqo luqadda xirfadlayaasha caafimaadka! Koorsadani waxay diiradda saartaa aqoonsashada iyo fahmizza erezada caafimaadka iyo qaab-dhismeedka jirka aadanaha. Waaad baran doontaa sida saxda ah ee loogu dhawaaqo loona hinkaadiyo ereybixinta caafimaadka, sida loo tarjumo iyo sida adeegsado erezada badanaa la soo gaabiyo ee caafimaadka ee lagu qoro foomamka iyo diiwaanada caafimaadka, iyo sidoo kale awooda qorista, akhrinta iyo tarjumaada kiisaska caafimaadka.

98616AO	Gunta Daryeelka Caafimaadka	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	-----------------------------	------	----	------------	-----

Ma daneyneysaa inaad sahmiso xirfadaha shaqo ee daryeelka caafimaadka? Iyadoo la adeegsanayo koorsadan heerka gelitaanka ah waxaad wax ka baran doontaa xirfadaha aasaasiga ah ee looga baahan yahay ka shaqeeynta xirfad kasta oo daryeelka caafimaadka ah. Mowduucyada waxaa kamid ah: wacyiga iyo dareemista baahida macmiilk/a/bukaanka, habdhaqanada guusha ah ee goobaha daryeelka caafimaadka, xirfadaha wada-xiriirkha ee loo baahan yahay, anshaxa, arrimaha sharciga, ixtiraamka kala duwanaanta macmiilk/a iyo shaqaalaha, heerarka badbaadada daryeelka caafimaadka iyo habraacyada.



Kombiyuutar Sayniska

NAQSHADEE. SOOSAAR. CILLAD-BIXI.



Ma daneyneysaa in aad wax ka barato isbed-beddeladii ugu dambeeyey ee kombiyuutar sayniska iyo tignoolajiyadda macluumaadka? Sahmi dunida ammaanka intarneedka iyo borogaraaminta kombiyuutarka - baro inaad adeegsato xirfadahaaga koodhgareynta si aad kor ugu qaado khibradda adeegsadaha, u sameyso ablikeeshino, u soo saarto geemamka la ciyaaro, u abaabusho xogta, u soo bandhigto dayacsanaanta webseedka, una abuurto jidgooyoyin ammaanka lagu sugayo.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
95616	Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska

Ballaari xirfadahaaga borogaraaminta kombiyuutarka! Koorsadan dhexdeeda waxaad horumarin doontaa xirfadaha aasaasiga ah ee xooggan ee loo adeegsado naqshadeyn taageelo iyo ablikeeshinko, ammaanka intarneedka, iyo robotyada. Xirfadaha waxaa kamid ah mas'alo xallinta, borogaraaminta macquulnimada ku dhisan, mashruuc maareynta iyo muhiimadda ay leedahay anshaxa kombiyuutarka.

95626	Kombiyuutar Sayniska A	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa
-------	------------------------	------	-----	------------	-----

Kombiyuutar Sayniska A PLTW

Khabbiir ku noqo JAVA iyo soosaarista ablikeeshinada Android™! La soco fikradaha kombiyuutar sayniska iyo aaladaha inta aad baraneyso qeyb-hoosaadka luqadda borogaraaminta ee Java. Iyadoo la adeegsanayo koox yar iyo mashruucyo gaar ah waxaad naqshadeyn doontaa, qori doontaa, oo aad tijaabin doontaa borogaraamyada kombiyuutarka ee xalliya dhibaatooyinka ama fuliye hawlaho.

95637 95638	Amniga Intarneedka 1 Amniga Intarneedka 2	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa
----------------	--	------	-----	------------	-----

Amniga Intarneedka 1 - 95637

Baro wax ku saabsan dunida ammaanka intarneedka! Koorsadan dhexdeeda waxaad qaadi doontaa tillaabada koowaad ee aad ku noqneyso Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka Shahaadeysan waxaadna baran doontaa mabaadii'da aasaasiga ah ee la xiriira arrimaha amniga intarneedka ee maanta taagan iyo sida loo aqoonsado loogana yareeyo loogana hortago weerarrada ka dhanka ah shabakadaha ganacsiga iyo kabayaasha muhiimka u ah howlgalka. Waa sidoo kale baran doontaa sida loo sameeyo loona habeeyo barkulanada, aaggaga ammaanka, hubinta, iyo siyaasadaha ku saabsan gidaarka difaaca shabakadaha ee Jiilasha-Xiga; iyo fikradaha ku lugta leh ilaalinta sugaanta ammaanka shabakadha ee deegaanka kombiyuutarka.

Amniga Intarneedka 2 - 95638

Noqo Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka ee ay Shahaadeeyeen Shabakadaha Palo Alto! Koorsadan dhexdeeda waxaad sii wadi doontaa inaad dhiso aqoontaada ammaanka intarneedka waxaadna baran doontaa sida loo ururiyo sirdoon garaadnimo sare leh, xog waaqici ah, waxaadna naqshadeyn doontaa shaqo socoshada ka hortagga ee otomaatiga ah oo si degdeg ah ku aqoonsata ugana jawaabta hanjabaadaha sida degdegga ah isu soo taraya. Ardayda sida guusha ah ku dhammeeya koorsadan waxay noqon karaan Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka ee ay Shahaadeeyeen Shabakadaha Palo Alto.



Ma daneyneysaa xirfad shaqo oo ah Amniga Intarneedka ama Borogaraaminta Kombiyuutarka?
Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogado!



Kombiyuutar Sayniska

NAQSHADEE. SOOSAAR. CILLAD-BIXI.



CTE | Onlayn

Ma jiro gaadiid loo baahan yahay - koorsooyinka ayaa laga bixiyaa dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

Koodhka Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
-------------------------	-----------------	---------	--------------	--------------------------------------	----------------------

91009AO	Sahminta IT	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	-------------	------	----	------------	-----

Sahmi xirfadaha kombiyuutar sayniska iyo tignoolajiyadda macluumaadka iyadoo la adeegsanayo qaabeeynta kombiyutarka iyo mashaariic madaxbanhaan. Koorsadan dhexdeeda waxaad horumarin doontaa xirfadaha la xiriira wax isu guubinta dhijitaalka ah, qalabka kombiyuutarka, nidaamyada uu ku shaqeyyo kombiyuutarka, shabakadaha isgaarsiinta, soosaarista softiweerka, keydadka xogta, iyo tignoolajiyadaha soo baxaya.

95607AO	Aasaaska Kombiyuutar Sayniska	Maya	1.0 sanad dhan	Ikhtiyaari	Haa
---------	-------------------------------	------	----------------	------------	-----


Sahmi sida hal-abuurada kombiyuutaradu u saameeyaan oo ay isugu xiraan dunideena. Koorsadan borogaraaminta ee horudhaca ah dhexdeeda waxaad sameyn doontaa ablkeeeshinada moobeelada, waxaad borogaraamin doontaa gawaari iyagu is-wada, waxaadna sameyn doontaa ablkeeeshinada farriimaha la isku dhaafsado adigoo adeegsanaya ApplInventor, Nidaamka Koodhgareynta Vex, Python iyo Cloud9. Tani waa koORSO onlayn ah oo ikhtiyaari ah oo sanadka oo dhan la dhigto waqtiyo kala duwan.

95637AO	Amniga Intarneedka 1	Maya	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	----------------------	------	----	------------	-----

Baro wax ku saabsan dunida ammaanka intarneedka! Koorsadan dhexdeeda waxaad qaadi doontaa tillaabada koowaad ee aad ku noqoneyo Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka Shahaadeysan waxaadna baran doontaa mabaadii'da aasaasiga ah ee la xiriira arrimaha amniga intarneedka ee maanta taagan iyo sida loo aqoonsado loogana yareeyo loogana hortago weerarrada ka dhanka ah shabakadaha ganacsiga iyo kaabayaasha muhiimka u ah howlgalka. Waxaad sidoo kale baran doontaa sida loo sameeyo loona habeeyo barkulanada, aaggaga ammaanka, hubinta, iyo siyaasadaha ku saabsan gidaarka difaaca shabakadaha ee Jiilasha-Xiga; iyo fikradaha ku lugta leh ilaalinta sugnaanta ammaanka shabakadda ee deegaanka kombiyuutarka.

95638AO	Amniga Intarneedka 2	95637	.5	Ikhtiyaari	Haa
---------	----------------------	-------	----	------------	-----

Noqo Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka ee ay Shahaadeyen Shabakadaha Palo Alto! Koorsadan dhexdeeda waxaad sii wadi doontaa inaad dhisto aqoontaada ammaanka intarneedka waxaadna baran doontaa sida loo ururiyo sirdoon garaadnimo sare leh, xog waaqici ah, waxaadna naqshadeyn doontaa shaqo socoshada ka hortagga ee otomaatiga ah oo si degdeg ah ku aqoonsata ugana jawaabta hanjabaadaha sida degdegga ah isu soo taraya. Ardayda sida guusha ah ku dhammeeya koorsadan waxay noqon karaan Farsamoyaqaanka Ammaanka Intarneedka ee ay Shahaadeyen Shabakadaha Palo Alto.



Fanka Warbaahinta

NAQSHADEE. SAMEE. GUDBI.



Ma daneyneysaa in aad hal-abuurkaaga u adeegsato in aad ku naqshadeyso webseedyada, ku sameyso qoraalada baraha bulshada, ama aad ku wargeliso kuna maaweliso dhageysteyaasha? Fiiri koorsooyinkaan fanka warbaahinta oo kordhi xirfadahaaga aad wax ku gudbineyso oona naqshadee dunida dhijitaalka ah; soosaar maqal iyo muuqaal laga baahin karo ama laga siidaayo KBEM-Jazz88, oo ah idaacada Mowjadda Gaaban ee degmada dugsiga.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiwaangeli	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kuljeekha
92509 92519	Warbaahinta Hal-abuurka 1 Warbaahinta Hal-abuurka 2	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa

Warbaahinta Hal-abuurka 1 - 92509

Ballaari xirfadahaaga warbaahinta bulshada! Horumari xirfadaha war ku dhawaaqista ee idaacad TOOS HAWADA UGU JIRTA. Qaado doorka DJ, war tebiye, wareyste, iyo tebiyaha isboortiga ee ciyaar ka ciyaar ee goobaha aduunka dhabta ah - fasalka, bulshada, goobta shirkadda, iyo si madaxbanaan warbaahinta bulshada. Horumari xirfadaha tafatirka codka dhijitaalka ah, nuql qoraalka ganacsiga iyo xirfadaha ururinta wararka elegtarooniga ah adigoo dhacdooyinka wararka ku tebinaya tebin toos ah oo la jilayo.

Warbaahinta Hal-abuurka 2 - 92519

Noqo qof wax saameeya! Ardaydu waxaa ay bartaan xirfado horumarsan adigoo soosaaraya tebino kuu gaar ah, DJ, oona sameysanaya shaqsiyad tebinta raadiyaha hawada ku jira oo kuu gaar ah. Ku baro khibrado baraatiko ah (mid la jilayo iyo mid tebin toos ah) oo loo adeegsado raadiyaha Twin Cities iyo qeybta wax tebinta. U shaqee si madaxbannaan, koox yar dhexdeeda iyo kaqeyb ahaan kooxda wax soo saarka oo ay ku wehliyaan macalinkaaga, shaqaalaha idaacada raadiyadaha adigoo xallinaya caqabadaa maalinlaha ee ku lug leh war tebintaada iyo kala wadida idaacada raadiyaha.

92606 92616	Sawirqaadista Dhijitaalka 1 Sawirka & Tafatirka Horumarsan	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa

Sawirqaadista Dhijitaalka - 92606

Ma jeceshay in aad sawiro qaado oo aad diirada saarto macluumaadka nolosha? Sahmi sida loo qaado sawiro cajiib ah oo qiso ka hadlayo. Sahmi qeybaha kaamirada, mabaadii'da istuudiyyaha iyo iftiiminta dabiiciga ah, waxyaabaha uu ka kooban yahay sawirka, sawirka qaadista goobta iyo istuudiyyaha, wax-ka-beddelka sawirka ku jira kaamirada, iyo sida liis loogu sameeyo loona kala maareeyo sawiradaada la jaanqaadaya heerarka qeybta shaqada.

Sawirqaadista & Tafatirka Horumarsan - 92616

Ballaari xirfadahaaga sawirqaadista dhijitaalka ah si aad ugu darto tafatirista sawirka iyo waxyaboo uu ka kooban yahay oo hal-abuur leh. Baro sida loo hagaajyo sawirada looguna diyaariyo daabacaadda ganacsiga iyo isticmaalka dhijitaalka ah; horudhac ku darista muuqaal soosaarista, fikrad sheeko, qaababka muuqashada, naqshadeynta iftiiminta iyo dhaqdhaqajinta sawirka ee 3D-ga ah.

92709 92719	Muuqaalka Dhijitaalka ah 1 Muuqaalka Dhijitaalka ah 2	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa

Muuqaalka Dhijitaalka ah 1 - 92709

Ma daneyneysaa in aad naftaada ku cabbirto filim iyo muuqaal? Baro dhammaan wejiyada muuqaal soosaarista, oo ay ku jiraan soosaarista kahor iyo kadib, adigoo isla markaana sameynaya muuqaal dhijitaal ah; soo bandhigayo filim dheer, mid gaaban, YouTube, sawirka dhaqdhaqaaqaya iyo muuqaalada dhaqaaq-istaajinta. Qorshee, duub, oo tafatir muuqaalada adigoo adeegsanaya kaamirooyinka dhijitaalka ah iyo softiweerka xirfadeed.

Muuqaalka Dhijitaalka ah 2 - 92719

Ballaari xirfadahaaga muuqaal soosaarista oo horumari aqoonta farsamada horumarsan ee ku hawlgeledda kaamirada, maqal duubista, nidaamyada iftiiminta, wax ka beddelitaanada muuqaalka, sawirada, iyo sharciyada xuquuqda daabacaada. Khibrad u yeelo sida loo qoro nuqulka, abaabulidda sawirada, abuurista jilayaasha, saameyn ku darista muuqaalka.

Fanka Warbaahinta

NAQSHADEE. SAMEE. GUDBI.



CTE | Onlayn

Ma jiro gaadiid loo baahan yahay - koorsooyinka ayaa laga bixiyaa dugsigaaga sare xilli kasta oo maalinta ah.

Koodhka Isdiwaangelinta

Magaca Koorsada

Shuruud

Kiridhityada

Buuxineysaa
Shuruudaha
Qalin-jabinta

Kiridhitka
Kulleejka

92406AO

Adobe Photoshop

Maya

.5

Farshaxanka

Haa

Ma daneyneysaa sawirqaadista ganacsiga ama naqshadeynta sawirka? Dhis boortofooliyo naqshadaha dhijitaalka ah oo la jaanqaadeysa heerarka qeybta shaqada oo soo bandhig hal-abuurkaaga adigoo isla markaana baranaya qeybaha iyo isticmaalka Adobe Photoshop. Abuur shaqo farshaxan oo asal ah, wax ka beddel sawirada midabka, qurxi sawirada oo sahmi sida aad xirfadahaan ugu adeegsan karto fursado xirfadda fanka warbaahinta ah oo kala duwan.

92416AO

Adobe Illustrator

Maya

.5

Farshaxanka

Haa

Sahmi dunida sawir naqshadeynta oo baro softiweerka wax lagu sawiro ee ugu muhiimsan ee loo adeegsado loogada, summadaha, iyo warbaahinta badan. U adeegso Adobe Illustrator in aad ku abuурто shaqo farshaxan oo kuu gaar ah, baro aragtida fikradeed ee midabka, sawirista iyo ka koobnaanta, sawir-qoraaleedka iyo xirfadaha maareynta faylalka ee tayada leh.

92509AO

Warbaahinta Hal-abuurka 1

Maya

.5

Farshaxanka

Haa

Ballaari xirfadahaaga warbaahinta bulshada! Horumari xirfadaha war ku dhawaaqista ee idaacad TOOS HAWADA UGU JIRTA. Qaado doorka DJ, war tebiye, wareyste, iyo tebiyaha isboortiga ee ciyaar ka ciyaar ee goobaha aduunka dhabta ah - fasalka, bulshada, goobta shirkadda, iyo si madaxbanaan warbaahinta bulshada. Horumari xirfadaha tafatirka codka dhijitaalka ah, nuql qoraalka ganacsiga iyo xirfadaha ururinta wararka elegtarooniga ah adigoo dhacdooyinka wararka ku tebinaya tebin toos ah oo la jilayo.

92519AO

Warbaahinta Hal-abuurka 2

92509

.5

Farshaxanka

Haa

Noqo qof wax saameeya! Ardaydu waxaa ay bartaan xirfado horumarsan adigoo soosaaraya tebino kuu gaar ah, DJ, oona sameysanaya shaqsiyad tebinta raadiyaha hawada ku jira oo kuu gaar ah. Ku baro khibrado baraatiiko ah (mid la jilayo iyo mid tebin toos ah) oo loo adeegsado raadiyaha Twin Cities iyo qeybta wax tebinta. U shaqee si madaxbannaan, koox yar dhexdeeda iyo kaeqbahaan kooxda wax soo saarka oo ay ku wehliyaan macalinkaaga, shaqaalaha idaacada raadiyadaha adigoo xallinaya caqabaddaha maalinlaha ee ku lug leh war tebintaada iyo kala wadida idaacada raadiyaha.

92916AO

Daabacaadda Buuga Sannadka

Maya

.5

Farshaxanka

Maya

Sahmi aduunka naqshadeynta sawirada ee casriga ah iyo daabacaada kombiyutarka. Gacansii soosaarista buug-sanadeedka dugsigaaga sare adigoo isla markaana horumarinaya xirfadaha la xiriira qaabeeynta daabacaadda, sawirista elektarooniga, sawir-qoraaleedka, sawirqaadista caadiga ah iyo midda dhijitaalka ah, maareynta soosaarista, iyo saxafinimada.



Injineernimada

NAQSHADEE. DHIS. WAX CUSBOONEYSII.



Ma daneyneysaa sida sheeyaasha loo naqshadeeyo loona soosaaro? Mustaqbalkaaga injineernimada iyo tignoolajiyadda waxa uu ka bilaabmayaa halkan! Hel “aragtida qofka gudaha ku jira” ee sida injineeradu u adeegsadaan xirfadaha xisaabta iyo aqoonta sayniska si ay ugu xalliyan dhibaatooyinka ka taagan dunida dhabta ah. Hal ama labo koorso ka qaado Xarunta Tignoolajiyadda oo sahmi aagaga makaanikada, korontada, warshadaha ama injineerinka madaniga ah.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodha Isdiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
95406	Horudhaca Naqshadeynta Injineerinka	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa

Ma jeceshahay xallinta dhibaatooyinka? Koorsadan dhexdeeda sahmi aaladaha qabyo-sawireedka ee casriga ah oo ay ku jiraan daabacaadaha 3D iyo qalabka iskaanka, iyo qoraal qorista leesarka, iyo aalado kale oo kala duwan oo shaybaarka ah ilaa iyada oo la adeegsanayo mashaariic shaqsiyeed iyo kuwo koox yar. Fiiro gaar ah waxaa la saaraa qaabeysta kombiyutarka ee 3D-ga ah si wax loogu naqshadeeyo, wax loogu soosaaro, looguna qiimeeyo alaab hal-abuur leh.

95416	Mabaadii'da Injineerinka	Maya	1.0	Farshaxanka & Fiisikiska	Haa
-------	--------------------------	------	-----	--------------------------	-----

Soo hel injineerinka farsamada! Iyada oo la adeegsanayo hawlo baraatiko ah kor u qaad xirfadahaaga iyo fahamkaaga injineerinka iyo tignoolajiyadda injineerinka, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo nidaamyada iyo hababka wax soosaarista oo la jaanqaadaya tignoolajiyadda isbed-bedelaysa ee maanta jirta. Ardaydu waxa ay qaadan doonaan doorka injineerada iyo farsamoyaqaanada iyagoo isla markaana ku dabaqaya xirfadahooda xisaabta, sayniska, iyo tignoolajiyadda si ay mashaakilka ugu xalliyan. Doodaha waxaa looga hadlaa faa'iidooyinka iyo caqabadaha bulsho iyo siyaasadeed ee imaan kara ee ay keento isbeddelka tignoolajiyadeed.

95426	Elektarooniga Dhijitaalka	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa
-------	---------------------------	------	-----	------------	-----

Wareegyada (circuits) ee casriga ah waxa ay fogaan arag ahaan uga qeyb yihiin dhammaan dhinacyada nolosheena (tusaale, kombiyutarada, aaladaha caafimaadka, iyo elektarooniga dhijitaalka ah)! Baro oo horumari xirfadaha naqshadeynta wareegga (circuit); adeegsiga wareegyada macquulgalka ee elektarooniga ah iyo adeegsiga macquulgalka Boolean adigoo isla markaana kor u qaadaya fahamkaaga wareegyada (circuits) aasaasiga ah iyo fikradaha korontada iyada oo loo marayo shaqo kooxed, hababka wada-xiriirka, heerarka injineerinka iyo dukumiintiyeynta farsamada.

95506	Injineerinka Madaniga & Naqshadeynta Dhismaha	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa
-------	---	------	-----	-------------	-----

Waligaa ma la yaabtay waxa ay qaadatay in la naqshadeeyo oo la dhiso magaalada aad ku nooshahay? Koorsadan dhexdeeda waxaad qaadan doontaa doorka naqshadeeyaha iyo injineerka madaniga ah inta aad baranayo dhismayaasha la deggan yahay iyo kuwa ganacsiga, naqshadeynta goobta iyo horumarinta, iyo dhaqamada injineerinka ee caadiga ah; horumarinta xirfadaha xisaabaadka injineerinka, matalaadda farsamada, dukumiintiyeynta naqshadeynta, iyo naqshadeynta dhismaha ee 3D-ga ah.

95516	Wax-soo-saarka Ku Dhisan Kombiyutarka	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa
-------	---------------------------------------	------	-----	-------------	-----

Baro sida ay isugu xiran yihiin naqshadeynta injineerinka iyo hababka wax soosaarka si loo soosaaro badeecado ama loo xalliyo dhibaatooyinka naqshadeynta wax soosaarka. Baro wax ku saabsan wax ku qaabeysta kombiyutarka, qalabka Koontaroolka Mashiinka Otomaatiga ah ee Kombiyutarka (CNC), softiweerka Wax-soo-saarka Kombiyutarku Caawiyo (CAM), robotyada, iyo nidaamyada wax-soosaarka ee dabacsan.

95906	Naqshadeynta Injineerinka & Horumarinta	way kala duwan tahay	1.0	Farshaxanka	Haa
-------	---	----------------------	-----	-------------	-----

Xirfadahaaga injineerinka ee ogaanshaha sida loo adeegsado iyo hal-abuurka ganacsi u adeegso koorsadan waayo-aragnimada ah. Naqshadee alaab injineerin oo xuquuq laguu saari karo - fikradda koowaad ilaa qabyo-sawireedka oo qabyo-sawireedkaaga u soo bandhig xirfadlayaasha warshadaha iyo wax-soosaarka.

Robotyada & Tignoolajiyada Aan Duuliyaha Lahayn

NAQSHADEE. DHIS. KOODHGAREE. DUULI.



Xalli caqabadaha naqshadeynta warshadaha iyadoo la adeegsanayo robotyada & tignoolajiyada aan duuliyaha lahayn! Baro aasaaska naqshadeynta makaanikada, borogaraaminta macquulgalka ah, koodhgareynta iyo waxa ay qaadaneyso in la noqdo hagaha diyaarada aan duuliyaha lahayn ee ganacsiga oo shahaadeysan.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda North

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodhka Isdiiwaangilinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kulleejka
91639 91640	Robotyada Tignoolajiyadda Aan Duuliyaha Lahayn	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Robotyada - 91639

Baro sida robotyadu u xalliyaaan dhibaatooyinka dunida ee dhabta ah. Baro wax ku saabsan koontoroolka elektarooniga ee aasaasiga ah, makaanikada, iyo qeybaha borogaraaminta macguulgalnimada ee horumarsan. Horumari xirfadaha mashaakil xallinta, shaqada kooxda, iyo mashruuc maareynta.




Tignoolajiyadda Aan Duuliyaha Lahayn - 91640

Noqo hagaha diyaarada aan duuliyaha lahayn ee ganacsiga oo shahaadeysam! Naftaada gee meelaha aqoonta ee muhiimka ah ee Maamulka Duulimaadyada Federaalka (FAA) - cimilada duulista, maamulka kheyraadka shaqaalaha, hawlaho garoonka diyaaradaha. Ardaydu waxa ay sidoo kale baran doonaan koodhgareynta, farsamooyinka sawir-qaadista/muuqaal-duubista, iyo xiriirka macaamiisha ee waaqciga ah ee hagaha diyaarada aan duuliyaha lahayn ee ganacsiga.

Ballaari aqoontaada ku saabsan sida robotyada iyo diyaaradaha aan duuliyaha lahayn looga adeegsado goobo xirfadeed iyo shaqo oo kala duwan.

Ka fiiri fasalada injineerinka ee ku yaala bogga 16 iyo fasalada fanka warbaahinta ee ku yaala boggaga 14 iyo 15.



Ma daneyneysaa dhigashada fasalka Robotyada?
Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogaado!





Ma daneyneysaa in aad kororsato aqoon iyo khibrad baraatiko ah oo ku saabsan gawaarida? Baro sida loogu adeego oo loo dayactiro noocyoo badan oo baabuur ah iyo qalabka baabuurta isboortiga oo go'aanso haddii xirfadda qeybtan ay kugu habboon tahay.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda Roosevelt

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodha Isdiiendaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhikta Kulleejka
97101 97111	Gawaarida Aasaasiga Ah Gawaarida Horumarsan	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Gawaarida Aasaasiga Ah - 97101

Baro xirfadaha dayactirka baabuurta ee aasaasiga ah. Iyada oo la adeegsanayo waxqabadyo baraatiko ah iyo sheybaaro, baro habraacyada saxda ah ee gaari sameynta, badbaadada dukaanka gawaarida, sida loo adeegsado buug-gacmeedyada adeegga iyo qalabka baabuurta, hawigalka qalabka dukaanka gawaarida, iyo dayactirka adeegga caadiga ah sida kormeerka taayarada, xaaladaha saliida, heerarka saliida, beddelka iyo hagaajinta taayarada, iyo ilaalinta diiwaannada dayactirka baaburta.

Gawaarida Horumarsan - 97111

Dayactirka gaariga ee horumarsan. Koorsadani waxa ay kusii dhismeyso aqoontii lagu soo bartay Gawaarida Aasaasiga Ah 1. Waxqabadyo baraatiko ah iyo sheybaaro waxay diiradda saari doonaan fahamka sare ee waxqabadka matoorka, bareegyada, nidaamyada korantada baabuurta, istealinka, moolada iyo kaabaanada, iyo toosinta. Ardaydu waxaa ay bogaan koorsada iyagoo aqoonsanaya oona qabanaya adeegyada aasaasiga ah ee gaariga.

96701 96702	Matoorada Yaryar Baabuurta Isboortiga & Qalabka	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa
----------------	--	------	-----	------------	-----

Matoorada Yaryar - 96701

Ogow sida ay matooradu u shaqeeyaan. Baro wax ku saabsan qeybaha makaanikada, waxqabadka iyo dayactirka matoorada 2-da bustan iyo kuwa 4-ta bustan leh iyada oo la deegsanayo waxqabadyo baraatiko ah iyo leyliyada fasaika. Baro wax ku saabsan mabaadii'da shaqada matoorka iyo dhismaha, gubidda shidaalka, furfurista iyo xirxirista matoorada yaryar ee baasiinka ku shaqeeyaa.

Baabuurta Isboortiga & Qalabka - 96702

Aqonta aad u leadahay matoorada yaryar u adeegso qeybta baabuurta isboortiga. Baro cillad bixinta iyo dayactirka mootoooyinka yaryar ilaa baabuurta lagu soo adeegto (UTV) iyo waxkasta oo u dhixeeya. Koorsadani waxa ay diiradda saari doontaa matoorka, qeybaha dhaqaajiya matoorka, bareegga, iyo nidaamyada gudbiya saliida oo ay wehliso dayactirka guud.

97404	Dayactirka Isku Dhaca Baabuurta ASE 1	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa
-------	---------------------------------------	------	-----	-------------	-----

Qaad tallaabada koowaad ee aad ku noqneyso ASE ku shaadeysan Shilka yo Dayactirka Baabuurta. Koorsadan dhexdeeda waxaad horumarin doontaa xirfadaha dayactirka qolofka baaburta oo kala duwan oo ay ku jiraan: dayactirka iyo bedelista qeyb kamid ah qolofka gaariga, saarista, bedelista, iyo toosinta qeyb kamid ah qolofka gaariga ee gudaha iyo dibeda, kabida birta iyo buuxinta qolofka gaariga, alxanka biraha iyo goynta, hababka dayactirka ee la xiriira balaastikada iyo koolada.

97414	Dayactirka Isku Dhaca Baabuurta ASE 2	97404	1.0	Farshaxanka	Haa
-------	---------------------------------------	-------	-----	-------------	-----

Dayactirka isku dhaca baaburta ee horumarsan. Koorsadani waxa ay kusii dhismeyso aqoontii lagu soo bartay Dayactirka Isku Dhaca Baabuurta 1. Waxqabadyo baraatiko ah iyo sheybaaro waxay diiradda saari doonaan fahamka sare ee diyaarinta dusha sare, isticmaalka qoryaha buufinta riinjiga iyo qalabka la xiriira, sida loo qiimeeyo cilladaha riinjiga, sida loo qaso, loo waafajyo loona mariyo riinjiga. Dhaqamada badbaadada shakhsiyed iyo deegaanka ayaa xoogga la saari doonaa.



Ma daneyneysaa khibrad aan mushaari ahayn oo baaburta ah, oo tababar oo kale ah?

Barnaamijka baabuurta waxa uu qaataa dhawr shaqo bartayaal oo aan mushahar la siin sannad kasta si ay uga shaqeeyaan mashaariic madaxbannaan, tababar u siyaan ardayda, una bartaan sida loo maareeyo hawlo kala duwan oo la xiriira ka shaqeeynta dukaanka baaburta. Kala hadal macalinkaaga haddii aad daneyneyso fursadan.

Dhismaha & Alxanka

NAQSHADEE. DHIS. SAMEE.



Kartidaada farsamo iyo farshaxan ku muuji ganacsigeena iyo sheybarkeena wax soo saarka! Baro haddii xirfad ah dhismaha iyo alxanka ay kugu habboon tahay - horumari xirfado aad adeegsan doonto cimrigaaga.

CTE | Xarunta Tignoolajiyadda Roosevelt

Waxaa ku jira gaadiid bilaash ah oo lagu tagayo loogana soo laabanayo Xarunta Tignoolajiyadda.

Koodha Isdiiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kuljeejka
96212 96222	Ganacsiga Dhismaha 1 Ganacsiga Dhismaha 2	Maya	1.0	Ikhtiyaari	Haa

Ganacsiga Dhismaha 1 - 96212

Ma daneyneysaa xirfada dhismaha ama barashada xirfado dayactirka guriga ah oo qiimo badan? Koorsadan dhexdeeda waxaad horumarin doontaa nijaarrada alwaaxa ee aasaasiga ah, biraha, korontada, iyo xirfadaha tuubo-sameynta oo ay weheliso adeegsiga badbaadada ah ee gacanta iyo qalabka korontada ku shaqeeya ee khuseeya xirfad kasta.

Ganacsiga Dhismaha 2 - 96222

Siiwad horumarinta dhismahaaga iyo xirfadaha adigoo adeegsanaya mashaariic shakhsii ahaaneed iyo kuwo kooxeed oo ah nijaarnimada, fiilooyinka korantada, tuubo-gelinta, fareem-saaridda gidaarada, rakibaadda albaabada iyo daaqadaha, dhagaxyada shamiitada iyo qaar kale oo badan.

96526 96536	Alxanka 1 Alxanka 2	Maya	1.0	Farshaxanka	Haa
----------------	------------------------	------	-----	-------------	-----

Alxanka 1 - 96526

Ma daneyneysaa in aad noqoto alxamiste? Baro sida farshaxanka alxanka loogu adeegsado goobaha farshaxanka iyo warshadaha. Horumari xirfadaha aasaasiga ah ee la xiriira badbaadada, rakibaada qalabka, wareejinta birta, gaashaamidda gaaska iyo alxamida biraha kala duwan. Fasalkani waxa uu diirada saarayaa biraha wax lagu alxamo ee oxyacetylene iyo alxanka gaaska tungsten.

Alxanka 2 - 96536

Koorsadani waxa ay ku dhismeysaa xirfadihi lagu dhigtay Alxanka 1 waxayna diiradda saartaa shaqooyinka iyo xirfadaha looga baahan yahay qeybta dhismaha. Horumari xirfadaha alxanka biraha gaashaaman iyo alxanka biraha gaaska iyadoo la adeegsanayo mashiinka baraatikada iyo hawlo baraatiyo ah, iyo booqashada goobaha shaqooyinka dhismaha iyo xarumaha tababarka ee ururka shaqaalaha.



Ma bogtay heerarka 1 iyo 2 mana dooneysaa in dhisida xirfadahaaga farsamo aad ku sii wado khibrad shaqo barasho u eg oo aan mushahar lahayn? Barnaamijka dhismaha iyo alxanka waxa uu qaataa dhawr shaqo bartayaal oo aan mushahar la siin sannad kasta si ay uga shaqeeyaan mashaariic madaxbannaan, tababar u siyaan ardayda, una bartaan sida loo maareeyo hawlo kala duwan oo la xiriira socodsiinta shaybaarka dhismaha iyo alxanka. Kala hadal macalinkaaga haddii aad daneyneyso fursadan.



Ma daneyneysaa Dhismaha Warshadaha iyo Alxanka?
Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogaado!



Tignoolajiyadda Mashiinka

QORSHEE. CABBIR. SAMEE.



Ma daneyneysaa barashada ku saabsan wax soosaarista iyo ku hawlgelida aaladaha mashiinka ah? Wax soosaarista maanta waxa ay ku saabsan tahay tignoolajiyadaha horumarsan, tas-hiilaadka casriga ah, iyo jawi shaqo oo degdeg ah. Baro xirfadaha shaqooyinka wax soosaarka ee loo baahi qabo: Borogaraamiyeeyasha aaladda mashiinka CNC, hawladeenada aaladda mashiinka ee kombiuyutarka lagu koontaroolo, iyo farsamoyaqaanada makaanikada elektarooniga.

CTE | South High School

Gaadiid lama bixinayo sanad dugsiyeedka 2024–2025.

Koodhka Isdiiwaangelinta	Magaca Koorsada	Shuruud	Kiridhityada	Buuxineysaa Shuruudaha Qalin-jabinta	Kiridhitka Kuljeejka
96301	Tignoolajiyadda Mashiinka 1	Maya	.5	Farshaxanka	Haa

Kor u qaad aqoontaada iyo xirfadahaaga isticmaalka qalabka gacanta ee caadiga ah, mashiinada lagu bedelo qaabka sheyga, qaabeeyayaasha, mashiinka wax lagu duleeliyo, mishiinada wax lagu shiido, iyo shiidiyaasha. Fasalkan dhexdiisa ardaydu waxa ay yeelan doonaan khibradaha baraatiykada ah ee aasaaska farsamada aasaasiga ah iyo mabaadii'da loo adeegsado saxnaanta warshadaha wax soo saarka.

96302	Tignoolajiyadda Mashiinka 2	96301	.5	Ikhtiyaari	Haa
-------	-----------------------------	-------	----	------------	-----

Koorsadan waxa ay ku dhismaysaa xirfadhi lagu soo horumariyey koorsadi Tignoolajiyadda Mashiinka 1 iyadoo xooga la saarayo saxnaanta shaqo qabashada. Ardayda waxaa laga filayaa inay si dheeraad ah uga qeybqaataan marxaladaha qorsheynta ee shaqada iyo in door muhiim ah ay ka qaataan abaabulka iyo maamulka dukaanka.

96303	Tignoolajiyadda Mashiinka 3	96302	.5	Ikhtiyaari	Haa
-------	-----------------------------	-------	----	------------	-----

Koorsadan horumarsan waxay diyaargarow qjimo badan u leedahay ardayda daneyneysa xirfadaha shaqooyinka aaladda mashiinka, wax soosaarista, makaanikada elektarooniga ama injineerinka. Shaqada mashruuca waxa ay ku saleysan tahay danaha, xirfadaha, iyo awooda. Ballaari khibradaha dukaanka mashiinada ee isku keenista kala duwan ee hababka aasaasiga ah, hababka, iyo geedi socodka sida ay u khuseeyaan qalabka dukaanka mashiinka.

Ma bogtay heerka 1 iyo 2 mana dooneysaa in dhisida xirfadahaaga farsamo aad ku sii wado khibrad shaqo barasho u eg oo aan mushahar lahayn? Barnaamijka tignoolajiyadda mashiinka waxa uu qaataa dhawr shaqo bartayaal oo aan mushahar la siin sannad kasta si ay uga shaqeeyaan mashaariic madaxbannaan, tababar u siyaan ardayda, una bartaan sida loo maareeyo hawlo kala duwan oo la xiriira socodsinta shaybaarka dhismaha iyo alxanka. Kala hadal macalinkaaga haddii aad daneyneyso fursadan.
--




**Ma daneyneysaa shaqo mustaqbalka ah oo ah ganacsiyada iyo wax soosaarista?
Halkan guji si uu lataliyahaagu u ogaado!**



WAXBARASHADA XIRFADA & FARSAMADA

**Wixii macluumaaad dheeraad ah oo
ku saabsan CTE ee Dugsiyada
Dadweynaha ee Minneapolis, ka fiiri
webseedkeena:**

cte.mpls.k12.mn.us



cte.mpls.k12.mn.us

**MAANTA
IS-DIIWAANGELI!**

